

Ku jirta afar-geeska hadalka

Miyaa ilmahaagu doonayaa inuu nala barnaamijeeyo ciyaar xilliga fasaxa?

Koorso fasaxa ah oo bilaash ah dhinaca barnaamijeynta Madxafka farsamada

Nabadeey waalidiinow! Iminka waxaad ilmahaaga ka diiwaan gelin kartaa koorso barnaamijeynta ah oo bilaash ah dhinaca Madxafka farsamada xilliga fasaxa. Waxaa intaasi dheer inaanu anagu diyaarino gaadiidka lagu imanayo madxafka lagagana tagayo – bilaa kharash.

Miyaa ilmahaagu xiiseeyaa barnaamijeynta? Markaasi waxaad ilmahaaga ka diiwaan gelin kartaa koorso si loo barto samaynta ciyaar lagu sameeyay barnaamij luqadeedka Scratch. Koorsadani waxay ku haboontahay caruurta ah 10–12 sanno. Koorsadan waxaa la qabtaa fasaxyada oo dhan, taariikhda hoos ka eeg. Wakhtiga: saacada 10.00–15.00 kana dhacaysa madxafka. Bas ayaa imanaya oo ilmahaaga ka soo qaadaya xaafada iskoolka.

Taariikhda koorsooyinka fasaxyada ee 2018:

Toddobaadka 14: 3-6 abriil

Toddobaadka 24: 11-14 juun

Toddobaadka 25: 18-21 juun

Toddobaadka 26: 25-28 juun

Toddobaadka 27: 2-5 julaay

Toddobaadka 32: 6-9 agoosto - toddobaadka gabdhaha ee barnaamijeynta

Toddobaadka 33: 13-16 agoosto

Diiwaan-geli xiisahaaga ugu dambeyn 16-ka maarso dhinaca fasaxa booskiga iyo 25-ka maay dhinaca fasaxa xagaaga iyadoo e-mail loo dirayo jeanette.sandberg@tekniskamuseet.se, ama iyadoo la marayo la-taliyaha fasalka. Sheeg magaca ilmahaaga, da'da, iskoolka, moobil lambarka waalidka iyo sheegida haddii ay jiraan wax xasaasiyad ah. XUSUUSNOW: Waxaa jira tiro boosas ah oo yar dhinaca koorsooyinkayaga barnaamijeynta. Haddii tirada codsadayaashu ka badato tirada boosaska waxaanu qaadaynaa nasiib tuurid.

Waxaanu sugaynaa diiwaan-gelinta xiisahaaga!

/ Salaan diiran oo ka timi macalimiinta Madxafka farsamada